

Tallaalka koroonaha ee haweenka uurka leh

Warbixin kooban oo ka socota Machadka Caafimaadka Dadweynaha oo ku saabsan tallaalka cudurka koroonaha ee covid-19.

Ku saabsan covid-19

Haweenka uurka leh waxay ku imanaya halis dheeraad ah oo ku saabsan in ay aad ugu bukoodaan cudurka covid-19. Halista ah in ay aad u bukoodaan waxay sii badanaysaa marba marka ka dambaysa xilliga uurka. Machadka Caafimaadka Dadweynuhu wuxu taas darteed ku talinayaa in haweenka uurka leh isku tallaalaan labo irbadood oo tallaalka koroonaha ah.

Talooyin:

- In dhammaan haweenka uurka leh ee aan wada qaadan tallaalka koroonaha ee asaasiga waxa lagula talinayaa inay qaataan tallaalka aasaasiga ah. Taladani kuma xidhna halka uurku marayo (tirimesterka).
- Haweenka uurka leh waxa lagula talinayaa inay islamarkaana qaataan irbadda tallaalka ee xoojinta ah. Arrintaasi waxay muhiimad gaar ah u leedahay haweenka uurkoodu marayo tirimesterka 2-aad ama ka 3-aad ee islamarkaana 20 toddobaad laga joogo markii ay qaateen irbaddii 2-aad, waxa kale oo sidoo kale lagula talinayaa haweenka uurkoodu marayo tirimesterka 1-aad haddii haweenayda uurka leh ay cidir kale qabto.

-

Sabab

Tallooyinka Norway ee ku saabsan tallaalka koroonaha iyo haweenka uurka waxay yimaadeen kadib markii la helay xog dheeraad ah oo ku saabsan sida tallaalku u saamaynayo hooyada iyo ilmaha. Waxyaalaha aannu ka ognahay saamaynta tallaalku waa wax annu inta badan ka helnay waddamo kale. Ingiriiska waxa tusaale ahaan ku badnaa is-qaadsiinta cudurka, waxaana jira haween uur leh oo door ah oo la dhigay isbitaallada.

Daraasado cilmiyeed oo caalami ah ayaa muujinaya in haweenka uurka leh ee covid-19 ku dhaco ay halis dheeraad ah ugu jiraan in isbitaal la dhigo islamarkaana u baahdaan in laga caawiyo neefsashada marka la barbardhigo kuwa aan uurka lahayn ee la da'da ah, qaybta u baahatay in laga caawiyo neefsashadu waxay la korodhay dhammaan noocyada kala duwan fayruuska. Waxa kale oo la arkay in ay kordhayso halista ah in ilmuhu ka soo hor dhasho xilligiisa, marka la barbardhigo haweenka uurka leh ee aan covid-19 ku dhicin islamarkaana uurkoodu marayo xilli la mid ah. Halista ku saabsan dhibaatooyinka neefsashada iyo in ilmuhu xilligiisa ka soo horreeyo waa wax dhif iyo naadir ku dhaca haweenka uurka leh ee si buuxda u tallaalkan.

Daraasadahani waxay muujinayaan sida tallaalku cudurka daran uga difaacayo hooyada, waxaanay xaqiijinayaan muhiimadda ay leedahay in la is tallaalo oo cudurka la iska difaaco haddii ay suurtagal tahay. Maadooyinka difaaca jidhka ee hooyadu samayso tallaalka kadib ayaa u wareegi doona ilmaha uurka ku jira, oo markaa keenaya in ilmuhuna helo difaac. Ma jiraan wax daraasaddo ah oo muujinaya in tallaalku si xun u saamaynayo uurka ama ilmaha uurka ku jira.

Waxyellooyinka tallaalka

Tittel: Koronavaksine til gravide

Språk: Somali

Opprettet: 01.12.21

Oppdatert: 16.02.22

Waxyeellooyinka caadiga ah ee ah madax-xanuun, daal, in la dareemo in la xanuunsanayo, xummad/qandho, lalabo iyo xanuun laga dareemo jidhkoo dhan ayaa ah waxyaalo haweenka uurka lehna ay dareemaan. Waxyaalahan waxa inta badan la dareemayaa maalinta koowaad ama labaad ka dib markii la is tallaalay waxaanay soconayaan 2-3 maalin. Tallaallada Norway laga oggol yahay ma lagu arkin waxyeellooyin u gaar ah uurka.

Halkee ayaan ka qaadan karaa tallaalka koroonaaha?

Weydii umulisada, dhakhtar ama barta internetka ee degmadaada ka eeg meesha aad ka qaadan karto tallaalka koroonaaha.

Macluumaad dheeraad ah

Faahfaahin ku saabsan tallaalka koroonaaha ka akhriso [Vaksinasjonsveilederen](https://www.fhi.no/nettpub/vaksinasjonsveilederen-for-helsepersonell/vaksiner-mot-de-enkelte-sykdommene/koronavaksine/), <https://www.fhi.no/nettpub/vaksinasjonsveilederen-for-helsepersonell/vaksiner-mot-de-enkelte-sykdommene/koronavaksine/>

Faahfaahin ku saabsan tallooyinka haweenka uurka leh iyo kuwa naasnuujiya ka akhriso [Koronaveilederen](https://www.fhi.no/nettpub/coronavirus/befolkningen/rad-for-gravide-og-ammende/), <https://www.fhi.no/nettpub/coronavirus/befolkningen/rad-for-gravide-og-ammende/>